**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka**
**Hirgelinta Dastuurka**

جمهورية الصومال الفدرالية
لجنة المراجعة ومراقبة
تنفيذ الدستور

**Federal Republic of Somalia**
**The Constitution Review and Implementation Oversight**
**Committee (OC)**

**Tix: GLD/BFS/96/03/2024** **Taariikh: 27/03/2024**

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS
Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare BFS
Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS
Og: Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

Ujeeddo: Soo Gudbin Nuqulka Kama Dambaysta ah ee Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubka 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka ee BFS wuxuu si waafaqsan qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka, Qodobka 108aad iyo 109aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka, Qodobka 81aad ee Xeer Hoosaadka Aqalka Sare iyo Qodobka 5(7) ee Qaraarka Ansixinta Habraaca Wax-kabeddelka Dastuurka halkan idinku soo gudbinayaa nuqulka kama dambeysta ah ee soojeedimaha wax-kabeddelka cutubka 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka ee usoo diyaariye Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, uuna aqbalay Guddiga La-socodka ee dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ee BFS.

Mudane Guddoomiye, Guddiga wuxuu xaqiijiyey in Guddiga Madaxbannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ay soojeedimahan kama dambaysta ah ee cutubyada 1aad ilaa 4aad ku soo dhafeen natiijada latashiyadii kala duwanaa iyo talooyinka xildhibaannada labada aqal ee BFS intii lagu gudajiray ka doodista cutubyadan oo ka koobnaa 16 kulan oo si wadajir ah ay u yeesheen xidhibaannada labada aqal ee BFS.

Haddaba, Guddigu wuxuu si xushmad iyo qaddarin leh u codsanayaa in nuqulka kama dambaysta ah ee soojeedimaha loo gudbiyo xildhibaannada labada aqal ee BFS si ay waajibaadkooda uga gutaan si waafaqsan qodobka 136(1) ee Dastuurka iyo qodobka 5(7) ee Qaraarka ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf "Xuseen Iidow"
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka
Dib-u-eegista Dastuurka.

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GUDDIGA DIB U EEGIDDA IYO LA SOCODKA HIRGALINTA DASTUURKA

Address: Km-0 | Degmada Shibis – Banaadir | Muqdisho, Soomaaliya.
Email: info@dastuurka-bfs.s, oc@parliament.gov.so | website: www.dastuurka-bfs.so

**Markuu Tixgeliyey:** Soojeedimaha iyo talooyinka guddoonka, xildhibaannadii dawlad goboleedyada, maamulka SSC-Khaatumo iyo maamulka Gobolka Banaadir ee ka soo qaybgalay Shirkii Latashiga Dastuurka ee qabsoomay $27^{kii}$ –$29^{kii}$ Febraayo 2024.

**Markuu Helay:** Natiijooyinka ka soo baxay aragti dhiibashada barnaamijka danabaysan ee latashiga dadweynaha dib-u-eegista dastuurka oo socday 17 $^{kii}$ – 21 $^{kii}$ Maarso, 2024.

**Markuu Arkay:** Jawaab celinta iyo talooyinka hay'adaha ku xusan Qodobka 3(3) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Wuxuu, halkan kuugu soo gudbinayaa nuqulka kama dambaysta ah ee soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka oo Guddigu diyaariyey kadib markii uu kusoo daray natiijada latashiyadii la sameeyey iyo soojeedimihii iyo talooyinkii xildhibaannada labada aqal ee marxaladdii labaad, si loo dhamaystiro tallaabooyinka muhiimka u ah marxaladda seddexaad.

*Wa Billaahi Tawfiiq.*

26/2024

**Avv. Burhaan Aadan Cumar**
**Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.**

GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA
INDEPENDENT CONSTITUTIONAL REVIEW AND IMPLEMENTATION COMMISSION



KM-0, Degmada Shibis, Muqdisho – Soomaaliya
**Email:** chairperson@icric.gov.so **Website:** www.icric.gov.so

## ARAR

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMDHD) wuxuu diyaariyey nuqulka kama dambaysta ah ee soojeedinta wax-kabeddelka cutubka 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka Ku-meel-gaarka ah, kaas oo lagu soo dhafay soojeedimihii xildhibaannada labada aqal ee Baarlamaanka Federalka Soomaaliya (BFS) iyo natiijada latashiyadii la sameeyey. Guddigu markii uu diyaarinayey nuqulkan soojeedinta wax-kabeddelka waxa uu fallaanqayn iyo lafogurid ku sameeyey dooddii xildhibaannada labada aqal iyo natiijada latashiyo ballaaran oo lala sameeyey qaybaha kala duwan ee bulshada oo ay ka mid yihiin culummada, ururrada bulshada rayidka, dhallinyarada, haweenka iyo wakiillada dawlad goboleedyada. Waxa kale oo guddigu aruuriyey ra'yiga dadweyne farabadan oo ku kala sugan dalka gudihiisa iyo dibaddiisa iyada oo la isticmaalayo hannaan casri ah oo danabaysan. Guddigu waxa uu tixgeliyey fikradaha dhammaan dadkii ka qaybqaatay wadatashiyada.

Kaddib u soo bandhigidda GMDHD nuqulka kama dambaysta ah xubnaha Guddiga La-socodka ee BFS, wuxuu aqbalay Guddiga La-socodka nuqulka kama dambaysta ah ee uu soo diyaariyey Guddiga Madaxabannaan.

Nuqulka kama dambaysta ah ee soojeedintan wuxuu ka koobanyahay afar qaybood oo kala ah: ***(a)*** Dastuurkii asalka ahaa; ***(b)*** Soojeedintii marxaladda 2aad ee wax-kabeddelka Dastuurka; ***(c)*** Nuqulka Kama Dambaysta Ah ee Lagu Soo Dhafay Soojeedimihii Xildhibaannada Labada Aqal ee BFS iyo Latashiyada la sameeyey oo u Soo Diyaariyey Guddiga Madaxabannaan Ee Dastuurka uuna ka Aqbalay Guddiga La-Socodka ee BFS, iyo ***(∂)*** Faallo tilmaamaysa is-beddellada la soojeediyey marxaladdii labaad ee doodda Baarlamaanka.

| Asalka Dastuurka KMG ah | Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo diyaariyay GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS | Nuqulka Kama Dambaysta Ah ee Lagu Soo Dhafay Soojeedimihii Xildhibaannada Labada Aqal BFS iyo Latashiyada oo u Soo Diyaariyey Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka uuna ku Aqbalay Guddiga La-socodka ee BFS | Faalo: |
|---|---|---|---|

| Cutubka Koowaad<br>Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya | | | |
|---|---|---|---|
| **Asalka Dastuurka KMG ah** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo diyaariyay GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS** | **Nuqulka Kama Dambaysta Ah Ee Lagu Soo Dhafay Soojeedimihii Xildhibaannada Labada Aqal ee BFS iyo Latashiyada oo uu Soo Diyaariyey Guddiga Madaxabannaan Ee Dastuurka uuna ku Aqbalay Guddiga La-Socodka ee BFS** | **Faalo:**<br>Faallo tilmaamaysa is-beddellada la soojeediyey marxaladdii labaad ee Doodda Baarlamaanka, haddi aysan jirin isbeddel yimid, waxaa loo daayey sidii ay ahayd Soojeedintii. |
| **Cutubka Koowaad:**<br>**Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | **Cutubka Koowaad:**<br>**Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | **Cutubka Koowaad:**<br>**Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | |
| **Qodobka 1aad: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | **Qodobka 1aad: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | **Qodobka 1aad: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | |
| (1)Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaal ah, leh gobannimo, dimoqraaddi ah, oo ku dhisan matilaadda dadweynaha, loo dhan yahay oo ku salaysan nidaamka axsaabta badan iyo caddaalad bulshadeed. | 1) Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaali ah, oo Muslim ah, lehna gobannimo, ku saleysan caddaalad iyo sarraynta sharciga. | 1) Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaal ah, muslim **sunni shaafici** ah, lehna gobannimo ku saleysan **caddaalad bulsho** iyo sarraynta sharciga. | Kaddib soojeedinta xildhibaannada labada Aqal ee BFS iyo latashiyada, waxaa faqraddan lagu soo kordhiyey ereyga **'sunni shaafici' iyo caddaalad bulsho.** Ereygii **"federaali"** ahna waxaa lagu beddelay **"federaal".** |
| | 2) Soomaaliya waa Jamhuuriyad dimoqraadi ah, oo ku dhisan matalaadda dadweynaha, loo dhan yahay kuna salaysan nidaam siyaasadeedka xisbiyada badan ee soo dhoweyneya kala duwanaanta afkaarta si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka | 2) Soomaaliya waa Jamhuuriyad dimoqraadi ah, oo ku dhisan matalaadda dadweynaha loo dhan yahay, kuna salaysan nidaam siyaasadeedka xisbiyada badan ee **tixgelinaya** kala duwanaanta afkaarta si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Kaddib soojeedinta xildhibaannada labada Aqal ee BFS iyo latashiyada, waxaa ereygii **"soo dhoweyneya"** lagu beddelay **"tixgelinaya".** |

| CUTUBKA LABAAD: XUQUUQDA ASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA MUWAADDINKA | | | |
|---|---|---|---|
| **Asalka Dastuurka KMG ah** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo diyaariyay GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS** | **Nuqulka Kama Dambaysta ah ee Lagu Soo Dhafay Soojeedimihii Xildhibaannada Labada Aqal ee BFS iyo Latashiyada oo u Soo Diyaariyey Guddiga Madaxabannaan Ee Dastuurka uuna ku raacay Guddiga La-Socodka** | **Faalo** Faallo tilmaamaysa is-beddellada la soojeediyey marxaladdii labaad ee Doodda Baarlamaanka, haddi aysan jirin isbeddel yimid, waxaa loo daayey sidii ay ahayd Soojeedintii. |
| Cutubka Labaad: Xuquuqda Asaasiga Ah Iyo Waajibaadka Muwaaddinka | Cutubka Labaad: Xuquuqda Asaasiga Ah Iyo Waajibaadka Muwaaddinka | Cutubka Labaad: Xuquuqda Asaasiga Ah Iyo Waajibaadka Muwaaddinka | |
| Madaxa Koowaad: Mabaadii'da Guud Ee Xuquuqda Aadanaha | Madaxa Koowaad: Mabaadii'da Guud Ee Xuquuqda Aadanaha | Madaxa Koowaad: Mabaadii'da Guud Ee Xuquuqda Aadanaha | |
| **Qodobka 10aad: Karaamada Aadanaha** | **Qodobka 10aad: Karaamada Aadanaha** | **Qodobka 10aad: Karaamada Aadanaha** | |
| (1) Karaamada aadanuhu waa deeq Ilaahey Subxaanahu wa tacaalaa ku mannaystay qof kasta oo Banii'aadan ah, xuquuqda aadanahuna deeqdaas ayey ka dhalataa. | 1) Karaamada aadanuhu waa deeq Ilaahey Subxaanahu Watacaalaa ku mannaystay qof kasta oo bani'aadan ah, xuquuqda aadanuhuna deeqdaas ayay ka dhalataa. | 1) Karaamada aadanuhu waa deeq Ilaahey Subxaanahu Watacaalaa ku mannaystay qof kasta oo bani'aadan ah, xuquuqda aadanuhuna deeqdaas ayay ka dhalataa. | |
| (2) Karaamada Aadanaha waa laguma-xadgudbaan, dhawristeeduna waa waajib saaran dadka oo dhan. | 2) Karaamada Aadanaha waa laguma-xadgudbaan, dhawristeeduna waa waajib saaran dadka oo dhan. | 2) Karaamada Aadanaha waa laguma-xadgudbaan, dhawristeeduna waa waajib saaran dadka oo dhan. | |
| (3) Awoodda Dawladda waa in aan marnaba loo isticmaalin meel-uga-dhicid karaamada Aadanaha. | 3) Awoodda Dawladda waa in aan marnaba loo isticmaalin ku xadgudbidda karaamada Aadanaha. | 3) Awoodda Dawladda waa in aan marnaba loo isticmaalin ku xadgudbidda karaamada Aadanaha. | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| jirdil. Gudniinka gabdhaha waa reeban yahay. | xaqiraad u dhiganta jirdil, waana uu reebban yahay. | dhiganta jirdil, waana uu reebban yahay. | ee BFS iyo latashiyadii la sameeyey, waxaa loo noqday asalka dastuurka, waxaana loo dhigay faqradda "Gudniinka gabdhaha waa caado naxariisdarro' |
| (5) Soo rididda ilmuhu waa arrin ka soo horjeedda Shareecada Islaamka, waana reebban tahay, haddii aan ka ahayn xaalad caafimaad aan looga maarmin badbaadinta nolosha hooyada. | | | |
| **Qodobka 16aad: Xorriyadda ka-mid-noqoshada** | **Qodobka 15aad: Xorriyadda Ka-mid-noqoshada** | **Qodobka 15aad: Xorriyadda Ka-mid-noqoshada** | |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro qof kale ama koox. Xaqaas waxaa ka mid ah inuu abaabulo ama ka mid noqdo ururro ay ka mid yihiin ururro shaqaale ama xisbiyo siyaasadeed. Wuxuu kaloo xor u yahay in uusan cidna ku biirin, lagumana qasbi karo inuu cid kale ku biiro. | Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro dad kale. Xaqaas waxaa ka mid ah inuu sameeyo ama ka mid noqdo ururro ay ka mid yihiin ururro shaqaale ama xisbiyo siyaasadeed. Wuxuu kaloo xor u yahay in uusan cidna ku biirin, lagumana qasbi karo inuu cid kale ku biiro. | Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro urur ama koox kale, xaqaas waxaa ka mid ah inuu sameeyo ama ka mid noqdo ururro ay ka mid yihiin ururro shaqaale ama xisbiyo siyaasadeed, wuxuu kaloo xor u yahay in uusan cidna ku biirin, lagumana qasbi karo inuu cid kale ku biiro. | Kaddib soojeedinta xildhibaannada labada Aqal ee BFS iyo latashiyadii la sameeyey, waxaa la soojeediyey in "dad kale" lagu beddelo "urur ama koox,". |
| **Qodobka 17aad: Xorriyadda Diinta iyo Caqiiddada** | | **Qodobka 16aad: Xorriyadda Diinta iyo Caqiiddada** | |
| (1) Qof kastaa wuxuu xor u yahay in uu ku dhaqmo diintiisa. | | (1) Qof kastaa wuxuu xor u yahay in uu ku dhaqmo diintiisa. | Kaddib soojeedinta xildhibaannada labada Aqal ee BFS iyo latashiyadii la sameeyey, asalka dastuurka ayaa la soo celiyey, ayadoo siiqayn lagu sameeyey. faqradda labaad ee qodobkan. |
| (2) Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | | (2) Laguma faafin karo diin aan ahayn diinta Islaamka geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | |
| **Qodobka 18aad: Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta** | **Qodobka 16aad: Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta** | **Qodobka 17aad: Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta** | |

